Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta Rasmiga ah

الرسمية الجريدة

Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 OCTOBER 2023** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# APRIL - OCTOBER

# 2023

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 129

Tariikh: 19/06/2023

XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA TARIIFADA KORANTADA.

XRW - BIXIT
20 JUN 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (i) ee Dastuurka KMG. |
| **Markuu arkay:** | Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG. |
| **Markuu arkay:** | Warqada summadeedu tahay **WTKHB/XW/040/23** ee ku taariikheysan Juun 18, 2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha. |
| **Markuu arkay:** | Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23 ee 19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay. |
| **Markuu tixgeliyey:** | Muhiimadda ay leeyihiin meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada. |

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.36.06.23** ee **19/06/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana **Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada.**

## Qodobka 3aad

Xeer Nidaamiyaha Tariifada Korantada waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-060-23
TAARIIKH: 09-07-2023
SAXIIX:
HANTIDHAWRAHA GUUD
AVV. Ahmed Isse Gutale

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA TAMARTA IYO KHAYRAADKA BIYAHA

# XEER-NIDAAMIYAHA TARIIFADA KORONTADA

Xeer Lr.: ............/

Juun, 2023

## TUSMO

**1. Magaca iyo Dhaqan-galka........................................................................................ 3**
**2. Baaxadda........................................................................................................................ 3**
**3 Ereybixin.........................................................................................................................4**
**4 Mabaadi' Guud.................................................................................................................. 5**
**5 Tariifo ku Jaan-go'an Adeeg-bixiye Gooni ah...................................................................... 6**
**6 Tariifo Guud...................................................................................................................... 7**
**7 Mabd'a Guud ee Tariifada....................................................................................................7**
**8 Deeqda, Kabka iyo Dhiirigalinnada..................................................................................... 8**
**9 Tixgalinta Kharashka Raasumaalka......................................................................................8**
**10. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka.................................................................8**
**11. Khidmadaha Rukhsadaha iyo Codsiga Ansixinta Tariifada............................................ 8**
**12. Qaabka Tariifada iyo Habka Dejinteeda............................................................................ 9**
**14. Habraaca Codsiga Tariifada............................................................................................ 10**
**15. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka iyo Isu-dheellitirka Xisaabaadka........ 11**
**16. Latashi dadweyne........................................................................................................ 11**

Si waafaqsan Sharciga Korontada, 2023 waxay Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha soo saaraysaa:

**XEER-NIDAAMIYAHA TARIIFADA ADEEGGA KORONTADA, 2023**

# QAYBTA 1AAD

## QODOBBO GUUD

### 1. Magaca iyo Dhaqan-galka

- **a.** Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Tariifada Adeegga Koronta, 2023.
- **b.** Xeernidaamiyahan wuxuu dhaqan galayaa taariikhda uu meel-mariyo Golaha Wasiirrada, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

### 2. Baaxadda

- **a.** Xeer-nidaamiyahan wuxuu ku dabbaqmayaa Adeeg-bixiyeyaasha Korontada dalka kuwa hadda jira iyo kuwa cusub intaba, oo ay ku jiraan milkiileyaasha, shaqaalaha, iyo macaamiisha adeegyada korontada, iyo sidoo kale dhinacyada ay khusayso oo ay ku jiraan hay'adaha dawladda, shirkadaha danta guud iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee hoos yimaadda Sharciga Korontada.
- **b.** Dhamaan Adeeg-bixiyeyaasha waa in ay soo gudbiyaan jaangoyntooda qiimaha tariifada si loogu ansixiyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyagoo usoo gudbinayo qaabka loo qeexay ugu yaraan laba (2) bil ka hor sannad-xisaabeedka xiga laga billaabo taariikhda faafinta Xeer-nidaamiyahan.
- **c.** Xeer-nidaamiyahan wuxuu ku dabbaqmayaa jaangoynta iyo ansixinta tariifada hawlaha dhalinta, gudbinta iyo qaybinta korontada nooc kasta ha ahaadeen.

## 3 Ereybixin

**a.** Inta lagu guda jiro Xeer-nidaamiyahan, haddaan si kale loola jeedin ereyada soo socda waxay yeelanayaan macnaha hoose,

I. **“Sharci”** waxaa loola jeedaa Sharciga Korontada

II. **“Isu Dheellitirka Xisaabaadka”** waxaa loola jeedaa isu dheellitirka xisaabaadka si loo jaangooyo faa’idada iyo khasaaraha adeeg-bixiyaha sannadkii ka horraysa xilliga la jaangoynayo tariifada;

III. **“Codsi”** ama **“Codsiga Ansixinta Tariifada”** waxaa loola jeedaa codsiga ansixinta tariifada ee uu soo gudbisto Adeeg-bixiyaha si uu macaamiisha koronto u siiyo;

IV. **“Hay’adda”** waxaa loola jeedaa Hay’adda Korontada Qaranka;

V. **“Biilka”** waxaa loola jeedaa curaarta lacageed ee macmiilka laga qaadayo ama looga baahan yahay in uu ku bixiyo isticmaalkiisa korontada;

VI. "**Macaamiisha"** waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

VII. “**Qaybinta**" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

VIII. " **Hay’adda Korontada Qaranka”** ama “**Hay’adda**" waxa ay la macno tahay sida lagu qeexay Sharciga;

IX. **“Adeeg-bixiye”** waxaa loola jeedaa shirkad ama shakhsi qaybiya isla markaana ka iibiya macaamiisha koronto laga dhaliyo hannaan gooni u dhisan ama shabakad guud ku xiriirsan, kaas oo leh ama aan lahayn qalab koronto dhalin;

X. **“Koronto”** ama “**Xoogga Korontada”** waxaa loola jeedaa tamarta laga helo danab koronto oo ku qulqulaya fiilooyin ama qalab kale;

XI. **"Khidmadda"** waxaa loola jeedaa lacagaha ku waajibay adeeg-bixiye koronto ama Rukhsadle, taas oo ay Hay’addu dejiso xilli ka xilli;

XII. **“Rukhsad Guud”** waxaa loola jeedaa ogolaanshaha bixinta adeegyo koronto sida dhalinta, gudbinta iyo qaybinta sida ku qeexan Sharciga;

XIII. **“Tariifo Guud”** waxaa loola jeedaa tariifo ku dabbaqmaysa adeeg-bixiyeyaasha ku qeexan Qodobka 6.b ee Xeer-nidaamiyahan;

XIV. **“Rukhsad”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga;

XV. **“Rukhsadle”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga;

XVI. **“MW”** waxaa loola jeedaa halbeegga cabirka korontada ee Meegawaatka;

XVII. **“Tamarta is-cusboonaysiisa”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga;

XVIII. **“Tariifada Iibka Tafaariiqda”** waxaa loola jeedaa qiimeyaasha go’an ee uu ku koco iibka koronta iyo qaybinteeda;

XIX. **“Gudbinta”** waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Sharciga.

**b.** Haddii aan si kale loogu sheegin, Xeer-nidaamiyahan:

**I.** Erayada sheegaya lab ama dheddig waxa ku jira jinsiga kale, kuwa kelida sheegayana waxa soo galaya wadarta, caksiguna waa sax.

**II.** Erayada ama tibaaxaha lagu isticmaalo Xeer-nidaamiyahan laakiin aan la qeexin waxa ay lahaanayaan macnaha ay ku leeyihiin Sharciga Korontada, 2023;

**III.** Tixraac walba oo lagu sameeyo qodob sharci waxaa soo galaya wax kabadillada lagu sameeyay ama qodobbada sharci ee kale ee hadba lagu baddelo iyo Xeer-nidaaminnada iyo wareegtooyinka kale ee ka dhasha waqti ka waqti;

**IV.** Haddii taariikh Xeer-nidaamiyahani waajibiyay in hawl qabsoonto aanay ahayn maalin shaqo, hawshaas waa in ay qabsoonto maalinta shaqo ee xigta.

## 4 Mabaadi’ Guud

**a.** Adeeg-bixiyaha korontada waa in uu Hay’adda codsi ugu soo gudbiyaa jaangoynta tariifada si loogu ansixiyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan ugu yaraan laba (2) bilood ka hor billowga sannad-xisaabeedka xiga.

**b.** Adeeg-bixiyaha korontada wuxuu codsiga tariifada soo gudbin karaa kaliya marka uu helo Rukhsadda laga ma maarmaanka u ah si waafaqsan Sharciga iyo Xeer-nidaamiyaha Rukhsadda Korontada.

c. Adeeg-bixiyuhu wuxuu macmiilka ku siin karaa korontada qiime ay isla qaateen si ku meel gaar ah, ilaa iyo inta ay jaangoynta tariifada ka ansixinayso Hay'adda.

d. Haddii ay Hay'addu meelmariso tariifada, jaangoynteeda ayaa barabixinaysa heshiiskii ay isla qaateen macmiilka iyo Adeeg-bixiyaha.

e. Tariifada ay meelmarisay Hay'adda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waxay dhaqangal ahaanaysaa sannad. Si kastaba ha ahaatee, Adeeg-bixiyaha korontadu waxa uu xaq u leeyahay dib u eegis ku salaysan qiimaha shidaalka iyo isbed-bedelka sicirka suuqa lixdii (6) biloodba mar.

f. Si waafaqsan Sharciga iyo Xeer-nidaamiyaha:

I. Qiimaha tariifada waa in uu ka turjumaa kharashka adeeg-bixinta galay isla markaana u ogolaadaa Adeeg-bixiyaha helitaanka faa'ido macquul ah'

II. Qiimaha tariifada waa in lagu xisaabiyaa deeqaha iyo kabka ay helaan shirkadaha;

III. Tariifada waa in ay u dhignaataa qaab dhiirri-galinaya tayaynta adeegga iyo maalgashiga dheeriga ah ee uu galinayo Adeeg-bixiyuhu;

IV. Tariifada waa in ay u qaabaysan tahay hab tix-galinaya noocyada kala duwan ee macaamiisha.

# QAYBTA 2AAD

## QAABKA TARIIFADA IYO FALSAFADDA LAGU DHISAYO

### 5 Tariifo ku Jaan-go'an Adeeg-bixiye Gooni ah

a. Iyada oo la raacayo Sharciga Korontada, Hay'addu waxay awood u leedahay inay go'aamiso una meel-mariso jaan-goynta tariifada Adeeg-bixiyeyaasha Korontada.

b. Adeeg-bixiyeyaasha Korontada, si loo gaaro xasillooni ganacsi waa in ay u xareeyaan codsiga tariifada qaabka lagu qeexay foomka Hay'adda.

c. Hay'addu waxay go'aamin doontaa jaan-goynta tariifada si waafaqsan mabaadi'da tariifada ee lagu asaasay Xeerarkan.

## 6 Tariifo Guud

a. Hay'addu, xilli ka xilli, waa in ay daabacdaa tariifo guud oo ku salaysan qiimaha iyo isbeddellada suuqa si loogu fududeeyo Bixiyeyaasha Adeegga Korontada.

b. Bixiyaha Adeegga Korontada ee u adeegaya macaamiil wadartoodu aysan ka badnayn <500> ama wadarta korontada ay macaamiishooda kula heshiiyeen ayna ka badnayn <150 KW – waxaa lagu dabaqayaa tariiftadan hadba sida ay ugu haboontahay sanad xisaabeedka la joogo.

## 7 Mabd'a Guud ee Tariifada

a. Tariifada hoos timaadda Xeer-nidaamiyahan markii la jaan-goynayo waa in ay ku salaysnaato kharash-ka adeegga oo ay faa'ido dheertahay waxaana kharashaatkaas la tixgalinayo qayb ka noqonaya:

I. Xaddiga qiimo dhaca; (ku salaysan hantida/agabka la aqoonsan yahay)

II. Kharashaadka dayactirka iyo shaqada;

III. Faa'idada raasumaalka;

IV. Canshuurta ku waajibaysa, iyo khidmadaha kale/ (sida khidmadaha Rukhsadaha);

V. Deymaha

VI. Qiimaha shidaalka iyo dib u eegista ku salaysan Qiimaha Shidaalka (sida ay ugu haboon tahay)

VII. Sarifka lacagaha qalaad iyo isbeddellada sicirka suuqa;

## 8 Deeqda, Kabka iyo Dhiirigalinnada

**a.** Markii ay go'aaminayso tariifada si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan Hay'addu waa in ay tixgelisaa wixii dhiirigelin, deeq ama kaalmo ah oo ay shirkaduhu ka helaan Dawladda, Deeq-bixiyayaasha, ama hay'adaha kale ee caalamiga ah, oo ay ku jiraan faa'iidada qiimo-dhaca degdegga ah, ee uu ka faa'iidaysanayo hawlaha bixinta adeegyada korontada,.

**b.** Deeq, kabitaan ama dhiirigelin kasta oo uu helo Adeeg-bixiyaha Korontada, kaas oo aan la tixgalin wakhtiga go'aaminta tariifada, waxa laga jaraya biilka Adeeg-bixiyaha Korontada ee soo socda ka dib marka la helo deeqdaas, kabka, ama dhiirigelinta hadba sida ugu haboon oo ay u qeexdo Hay'addu.

## 9 Tixgalinta Kharashka Raasumaalka

**a.** Si loo maareeyo sicir-bbararka suuqa, loona abuuro jawi ganacsi oo cadaalad ah, Hay'addu waxay tixgelin doontaa qiimaha raasumaalka maan-galka ah iyo arrimaha saamaynta ku leh sida sicir-bararka iyo kala duwanaanshaha sarifka lacagaha qalaad, si loo go'aamiyo loona ansixinayo tariifada.

## 10. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka

**a.** Adeeg-bixiyaha Korontada waxaa loo tixgalinayaa isbedbedalka qiimaha shidaalka lixdii (6) biloodba mar.

## 11. Khidmadaha Rukhsadaha iyo Codsiga Ansixinta Tariifada

**a.** Kharash kasta oo uga baxa Adeeg-bixiyaha helista Rukhsadda iyo meel-marinta tariifada waxaa lagu xisaabinayaa in uu qayb ka yahay kharashka galay bixinta Adeegga Korontada.

## 12. Qaabka Tariifada iyo Habka Dejinteeda

**a.** Hay'addu waa in ay u hoggaansantaa habka tariifada si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

**b.** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa in uu soo gudbiyaa dakhli sannadeedka celcelis ahaan loo baahan yahay soona bandhigaa qaab-dhismeedka tariifada iibka korontada ee dhammaan qaybaha macaamiisha xilliga loo asteeyay buuxinta codsiga si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo sharciyada kale ee lagu dabaqi karo.

**c.** Iyada oo lagu saleynayo codsiga uu soo gudbisanayo Adeeg-bixiyaha Korontada ee jaan-goynta tariifada, wixii kabis, dhiirigelin, ama qiima-dhimis ah, waa in tixgalin dhamaystiran la siiyaa lana ogaysiiyaa Hay'adda iyadoo la raacayo Xeer-nidamaayahan.

Waxaa laga ma maarmaan ah in tariifada iibka korontada ee Hay’adda loo soo gudbiyay ay noqtaa mid ka tarjumaysa kharashka galay bixinta adeegga, waxayna u oggolaan doontaa qaybaha kala duwan ee macaamiisha inay is kabaan si waafaqsan Sharciga.

**13.** Iyadoo aan wax loo dhimaynin qodobbada Xeer-nidaamiyahan, ka turjumidda kharashka baxay ma tilmaamayso in dhammaan kharashyada qorshaysan si toos ah loo tixgalinayo. Sidoo kale, baahida macaamiisha ee la odorrosayo si toos ah looma tixgalianayo.Hay’addu waxa ay hubinaysaa kharaashaadka qorshaysan ee loo soo gudbiyay ee ku aaddan hawlaha Rukhsadda in ay yihiin kuwo si sax ah uga turjumaya kharash macquul ah oo suurtagalinaya in baahida suuqa taalla ee sida ugu haboon loo odorrasay loo daboolo sida ugu haboon, iyadoo baahida macaamiisha lagu salaynayo xogaha la xaqiijin karo. Waxaa intaa dheer oo laga rabaa Adeeg-bixiyaha in uu heerka adeeg ee ugu sarreeya uu ku dadaalo in uu gaaro isagoo u maraya qorshe uu ku

yaraynayo khasaaraha iyo qorshayaasha kale ee tayada shaqadiisa sare loogu qaadayo, hadba sida ay ugu qeexan yihiin Heshiiska Rukhsadda.

# QAYBTA 3AAD

## CODSIGA TARIIFADA IYO HABRAACA NIDAAMINEED

### 14. Habraaca Codsiga Tariifada

**a.** Adeeg-bixiyaha Korontada waa in uu xareeyaa arjiga tariifada, iyo codsiga isu dheelli tirka xisaabaadka, mar kasta oo ay ku habboon tahay, isaga oo u maraya qaabka loo qeexay iyada oo ay la socoto khidmadda codsiga ee ku habboon.

**b.** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa in uu ugu soo gudbiyaa Hay'adda xogaha soo socda habka loo qoondeeyay oo ay la socoto qaabka tariifada si loo go'aamiyo jaan-goynta tariifada.

I. **Qiimaha Raasumaalka:** Adeeg-bixiyaha Korontada waa in uu soo gudbiyaa faahfaahinta kharashka raasumaalka ee ku baxay dhalinta, iyo qaybinta korantada. Kharashkaani waa inuu noqdaa mid lagu daro kharashka dhulka, kharashyada horumarinta, dhammaan raasumaalka shaqaynaya iyo kan aan shaqaynayn oo ay ku jiraan matoorrada iyo mashiinnada, shaqaalaha, dhismaha, kharashka maalgelinta, iyo kaabayaasha kale ilaa barta isku xirka shabakadda;

II. **Kharashaadka shaqada iyo dayactirka:** Kharashkan waa in ay ku jiraan qiyaasta dhammaan kharashyada uu galay Adeeg-bixiyaha Korontadu si uu u siiyo macaamiisha koronto. Kharashkan waa inuu ka kooban yahay mushaharka, gunnooyinka, kharashaadka maamulka, dayactirka qalabka iyo kharashka shidaalka haddii ay dhacdo in uu soo saaro koronto ku kacaysa shidaal;

III. **Deynta iyo amaahda:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu sidoo kale soo gudbiyaa faahfaahinta kharash kasta oo deyn/amaah ah oo ay ku jiraan ilaha lacagaha;

IV. **Xogta macmiilka:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa xogta hore loo hayay iyo tan odorroska ah ee macaamiisha labadaba, hadba sida ugu habboon, sida, tirada macaamiisha, xaddiga korontada xiran, wadarta baahida macaamiisha jirta iyo baahida macaamiisha ee la saadaaliyey;

V. **Xogta Xisaabaadka maaliyadeed:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa xisaabaadka maaliyadeed ee la hubiyay labadii sano ee u dambeeyay;

VI. **Deeqaha iyo Kabka:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa warbixin qeexaysa dhamaan xog kasta oo deeq, kab ama dhiirigelin ee laga helay, laga sugayo ama la filayo in laga helo, dawladda, Deeq-bixiyayaasha, hay'adaha caalamiga ah, ama hay'adaha kale ee guud iyo sida tan loo tixgaliyay;

VII. **Qorshaha maalgelinta:** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu soo gudbiyaa liiska maalgelinnada la filayo iyo/ama qorshayaasha casriyaynta hannaankiisa shaqo, haddii ay jiraan;

VIII. **Nooca tariifada**; iyo

IX. **Macluumaad kasta oo kale oo ay u dirto Hay'addu**

## 15. Dib-u-eegista ku Salaysan Qiimaha Shidaalka iyo Isu-dheellitirka Xisaabaadka

**a.** Adeeg-bixiyaha Korontada waxa uu xarayn karaa codsiga tixgalinta dib-u-eegista tariifada iyadoo loo eegayo isbeddelka qiimaha shidaalka sida ku cad qaabka loo qoondeeyey arjiga lixdii (6) bilood ee kasta oo ay la socdaan dukumentiyada lagama maarmaanka ah ee la xiriira kharashka dhabta ah ee uu shidaalku ku kacay.

**b.** Adeeg-bixiyaha Korontadu waa inuu xareeyaa codsiga isu-dheellitirka xisaabaadka, isaga oo raacaya habka loo qeexay, oo ay la socoto codsiga ansixinta jaan-goynta tariifada, mar kasta oo ay khuseyso.

## 16. Latashi dadweyne

**a.** Hay'addu, todoba (7) maalmood gudahooda aqbalaadda jaan-goynta tariifada iyo codsiga oggolaanshaha ka dib, waa in ay ku daabacdaa ogeysiis baraheeda bulshada iyo wargeysyada hormuudka ah ama warbaahinta kale ee elektiroonigga ah iyo kuwa daabacan iyada oo codsanaysa faallooyinka daneeyayaasha.

**b.** Hay'addu waa inay qabataa kulamo la tashi dadweyne oo toos ah ama kuwo fogaan arag ah, hadba sida suurtagalka ah, inta lagu guda jiro go'aaminta tariifada iyo ansixinteeda.